



# Minneapolis Oo Horey U Talaabsatay

Tilmaamaha Maqaayadaha & Baararka la furayo wixii  
ka dambeeya 1da Juun 2020

26 Maajo (May) 2020

## Ujeedooyinka Minneapolis Oo Horey U Talaabsatay

Dib u dhiska dhaqaalaha waa mid ah qodobada uu ku saleysan yahay hal abuurka Minneapolis oo Horey U Talaabsatay iyada oo aafada dhacday ay tahay mid u baahan in si wadajir ah, adkeysii leh, oo taabagal ah wax uga qabato Minneapolis. Hal abuurka Minneapolis Oo Horey U Talaabsatay waxaa ka mid ah:

1. Waxaa la diyaariyey talaabooyinka la qaadayo si loo raaco amarka Gudoomiyaha, oo ay ka mid tahay dib u furidda ganacsiga magaaladeena:
2. Ku dadaalaya in ganacsigu dib ugu noqdo halkii uu taagnaa Diseembar 2019 iyo heerkii maaliyadeed muddo labao sano gudahood ah.
3. Dhaqangelinta iyo adeegsiga xal ku saleysan aragtida mustaqbalka ee dhalin kara dhaqaale isku dhaf ah, awood iyo adkeysii leh ee Minneapolis.

Si loo gaaro hadafkaas waxaa loo baahan yahay in la qaado talaabooyin isku dhaf ah oo muhimadda koowaad siinaya caafimaadka dadweynaha, taasoo ku saleysan habka ugu sareeya ee looga dhaqmo gobolkeena, iyo abuuritaanka istaraatiijiyada iyo xirfado lagu gaari karo hadafkaas.

## Tusmo

Ujeedooyinka Minneapolis Oo Horey U Talaabsatay .....	2
Adeegga Fadhiga Gudaha Maqaayadda .....	5
Fadhiga Dibadda ee Maqaayadaha 1da Juun. ....	5
Baaritaanka Caafimaadka iyo Dhaqangelintiisa.....	5
Helitaanka Musqulaha.....	5
U diyaar groow u Gudbidda Wajiga Xiga Fadhiga Gudaha .....	6
Qorshaha U Diyaargarowga COVID-19 .....	6
Qorshaha Talo Siinta.....	6
Baaritaanka Caafimaadka. ....	6
Af daboolka.....	6
Nadiifinta, Daawo Ku Nadiifinta Iyo Ka Dilidda Dul Ku Noolaha.....	7
Kala fogaashaha iyo tirada dadka .....	7
Dhismayaasha.....	8
<i>Talo siin ku saabsan sida diyaargarow loogu diyaariyo in dib loo furo.</i> ....	8
Calaamadaha .....	8
Tixraaca kale .....	8
Qorsheynta ku dhajinta, tabarada iyo u hogaansanaanta.....	8
Balaarinta Dibadda La Fariisto .....	9
Waxyaabaha La Tixgelinayo Fadhiga Dibadda.....	9
Qurxinta .....	9
Bulshada Oo Noqota Xog Wadaag.....	9
Kharashka Leesinka (Ogolaashaha) .....	9
Noocyada Kala Duwan Balaarinta, Nidaamka Ogolaashaha iyo Kharashka .....	9
Ogolaashaha Balaarinta Ku Meel Gaarka Ah ee Dhismayaasha .....	9
Qaxwaha ee Wado Lugeedyada (Cafe).....	10
Isticmaalka cafe ee Wado Lugeedka Xaaladda Degdegga Ah. ....	11
Isticmaalka dhulka MPRB.....	11

Isticmaalka Dhulka Magaaladu Leedahay iyo Dhulka Cagaaran ee Wadooyinka .....	11
Dib U Eegista Iyo Ogolaashaha .....	11
Qabashada Codsiga. ....	11
Kharashka Isticmaalka Bulaacadda (SAC). ....	12
Dhaqangelinta.....	12
Sharciyada Xaaladda Degdegga Ah.....	12

## Adeegga Fadhiga Gudaha Maqaayadda

Magaaladu waxa ay qiimeyn ku sameysay tilmaamaha dib u furista ganacsiga ee 20 gobol oo ogolaaday in dib loo furo maqaayadaha oo yareeyey tirada dadka fadhi kaga cunteyn kara. Waxaanu kulamo u qabanay mulkiilayaasha maqaayadaha iyo hogaamiyayaasha ganacsiga, hogaamiyayaasha shaqaalaha, iyo ururada bulshada, si loo ururiyo ra'yigooda ee dib u furista ganacsiga. Waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee ka soo baxay waxaa ka mid ahaa:

- Fariin ay ka wadasiman yihiin oo lagu cadeeyey waxyaabaha laga filayo si loo furo ganacsiga si nabadgelyo u ah macaamiisha, shaqaalaha iyo mulkiilayaasha.
- Abuuritaanka kala fogaashaha dadka ugu yaraan 6 dhudhun taasoo shuruud u ah sida ganacsigu u shaqeeyo.
- Muhiimad siinta ilaalinta caafimaadka dadweynaha gaar ahaan kuwa ka shaqeeya ganacsiga.
- Abuuritaanka iyo raacitaanka habka nadiifinta iyo ilaalinta caafimaadka iyada oo lasiinayo tababarka iyo taageerada ee nadiifinta goobaha ganacsiga.
- Abuuritaanka tilmaamaha sida loo adeegsanayo af daboolka marada ka sameysan iyo waxyaabaha loo adeegsado nadaafadda.
- Wax ka bedelka sharciyada magaalada ee la xiriirta balaarinta ganacsiga ee dibadda iyo nidaamka kale ee taageeri kara wax ka bedelka qorshaha hawlgalka; iyo
- Siinta ganacsatada talada ku haboon ee dib u bilowga ganacsiga.

**Fadhiga Dibadda ee Maqaayadaha 1da Juun.** Iyada oo lagu saleynayo amarka Badbaadi Minnesota ee 20kii Maajo ee lagu joojiyey fadhiga gudaha maqaayadaha iyo baararka. Ganacsigaas waxaa dib loo furi karaa 1da Juun iyada oo laga doonayo in ay raacaan shuruudaha hoos ku xusan:

- In ay diyaariyaan qorshaha u diyaar garoowga COVID-19 ee ka soo baxa shuruudaha gobolka;
- Fadhiga dibadda maqaayadda oo kaliya, taasoo ka amaan badan in gudaha la fariisto;
- Masaafada u dhaxeysa miisaska ay noqoto 6 dhudhun;
- Aysan fariisan wax ka badan 50 qof fadhiga dibadda ee maqaayadda;
- Dadka wada fadhiga aysan ka badnaan 4 qof ama 6 qoysaska wada socda;
- Waa in balan la sii qabsadaa;
- Dhamaan shaqaaluhu waa in ay xirtaan af dabool; iyada oo
- Dadka soo booqanaya laga doonayo in ay xirtaan af dabool inta ay joogaan goobta ganacsiga. Waxaa jira talo siin ku saabsan marka af daboolka la iska furi karo iyo goorta la bedelayo.

**Baaritaanka Caafimaadka iyo Dhaqangelintiisa.** Waaxda Caafimaadka ee Magaalada waxa ay 1da Juun bilaabeysaa baaritaankii joogtada ahaa iyada oo eegeysa cabashooyinka. Marka la raaco nidaamkan waxaa is dhimaya waxyaabaha loo baahan yahay si dadku dibadda ugu cunteeyaan ka dibna loo gudbo fadhiga gudaha; taasoo kordhineysa dib u furitaanka maqaayadaha. Magaalada, oo kaashaneysa mulkiilayaasha ganacsiga, waxa ay sii qorsheyneysaa oo ay tababar ku saabsan qorshaha diyaargarooowga ee COVID-19 u fidineysaa shaqsiyaadka. Magaaladu waxa ay hab raaceysaa hab dhaqan gelin oo wadajir ah oo la kaashaneyso dhamaan dadka ku hawlan ganacsiga iyada oo isha ku heysa xubnaha jabiya nidaamka oo diyaar u ah in ay fara gelin ku samayso.

**Helitaanka Musqulaha** Waa in dadku isticmaali karaan musqulaha goobaha ganacsiga. Kordhinta inta jeer ee la nadiifiyo musqulaha iyo goobaha taabshadu ku badan tahay ee musqulaha, akhri tilmaamaha si aad uga hesho faahfaahin buuxda oo ku saabsan habka iyo goorta la nadiifinayo meelaha taabshadu ku badan tahay. Xisaabta ku dar in uu jiro hab dadka dibadda fadhiga ku gaari karaan suuliga si loo xaqiijiyo in macaamiishu toos u gaari karaan. Xisaabta ku darso in aad ku rakibtaan hab musqulaha lagu furi karo iyada oo aan gacmaha lagu taaban iyo weel qashinka lagu rido oo la dhigo albaabka musqusha si loo dhiirigeliyo isticmaalka warqadaha gacmaha lagu tirtirto marka la furayo musqusha.

## U diyaar groow u Gudbidda Wajiga Xiga Fadhiga Gudaha

Minnesota weli lama ogalaan in gudaha lagu cunteeyo, kaliya waxaa la ogol yahay fadhiga dibadda maqaayadaha laga bilaabo 1da Juun. Marka Minneapolis la ogolaado in gudaha lagu cunteeyo, waxa ay u badan tahay in Gobolka iyo Magaaladu soo saari doonaan talooyin la raaco wajigaas. Furitaanka wajiga xiga oo si tartiib tartiib ah loo furo ganacsiga waxaa xudun u ah caafimaadka dadweynaha iyo amaanka macaamiisha, shaqaalaha iyo mulkiilayaasha.

[Association of Food and Drug Officials \(AFDO\) \(Ururka Mas'uuliyiinta Cuntada iyo Daawada\)](#) waxa ay bixiyaan talo siin ku saabsan furitaanka tartiibta tartiibta ah ee ganacsiga cuntada iyo kuwa dadku wada xiriirayo. In si tartiib tartiib ah loo furo, waxa ay u baahan tahay in la dajiyo naqshadda goobta iyo masaafada u dhaxeysa miisaska iyadoo la xakameynayo inta qof ee ay u adeegi karaan, si tartiib tartiib ahna tirada loo kordhinayo marka aafadu sii yaraataba. The [National Restaurant Association \(Ururka Maqaayadeyda ee Her Qaran\)](#) waxa uu taageersan yahay fariintan isaga oo ku lamaaney hababka ay ganacsatadu u diyaarin karaan goobta, ugu sameyn karaan nadiifin, si loo xaqiijiyo degaan amaan ah ee shaqaalaha goobta.

## Qorshaha U Diyaargarowga COVID-19

### Qorshaha Talo Siinta

Maqaayadaha iyo baararka Minneapolis waxaa loo ogol yahay oo kaliya in dibadda la fariisto oo lagu cunteeyo laga bilaabo 1da Juun. Shuruudaha waxaa ka mid ah in goob kasta diyaariso qorshe ay dhaqan geliso qorshaha u diyaargarowga COVID-19. Qorshaha waa in aad ka talo gelisaa shaqaalahaaga. Shaqaalaha waa in lagu tababaraa qorshahan.

Waxda Shaqaalaha ee Minnesota waxa ay diyaarisay qorshe [tusaalaha tilmaamaha](#) iyo [talo siin](#).

Talo siinta waxaa lagu caddeeyey dhawr qodob oo ay waajib tahay in ay ka mid noqdaan qorshaha. Waxaa ka mid ah wacyi gelinta iyo calaamadaha.

**Baaritaanka Caafimaadka.** Waa in la baaraa caafimaadka shaqaalaha marka ay yimaadaan goobta ama ay soo sheegaan xaalad caafimaad. Waa in sidoo kale xisaabta ku darsataa in aad baarto caafimaadka dadka soo booqanaya goobta.

#### *Talo soo jeedinta baaritaanka caafimaadka.*

- Akhri [Talo soo jeedinta CDC](#) ee baaritaanka caafimaadka shaqaalaha ee COVID 19.
- Waxda Caafimaadka ee Minnesota waxaay abuurtay [liis](#) idin caawin kara.
- Diyaari hab aad kula socon karto macluumaadka lagaa doonayo.
- Weydii dadka soo booqanaya su'aalo la xiriira caafimaadka marka ay yimaadaan, ama fariin ahaan ugu dir, ama iimeyl marka balanta qabsanayaan.
- Ku dhaji calaamadaha caafimaadka ee Minneapolis ee xusuusinta caafimaadka si dadka soo booqanaya u xusuusnaadaan in ay qeybtooda ka qaataan.

### Af daboolka

#### *Maxaa loo baahan yahay?*

- Dadka degan iyo kuwa booqanaya magaalada waa ay u hogaansamaan [Sharciga Xaaladda Degdegga ah ee 2020-12](#) ee xirashada af daboolka.
- Akhri sharciyadan si aad wax uga ogaato waxyaabaha laga filayo dadka ee la xiriira af daboolka.

#### *Talo soo jeedin ku saabsan xirashada af daboolka*

- Ka iibi dadka soo booqanaya af daboolka.
- Ku dhaji calaamado muujinaya sharciga magaalada ee xirashada af daboolka iyo calaamadda magaalada ee xoojinta go'aanka Duqa Magaalada oo la socodsii dadka soo booqanaya.

- U ogoloow shaqaalaha waqti ay nasasho gaaban qaataan, gaar ahaan kuwa ka shaqeynaya goobaha kulul.

**Nadiifinta, Daawo Ku Nadiifinta Iyo Ka Dilidda Dul Ku Noolaha.** Qorshaha U Diyaargarowga COVID-19 waxa uu u baahan yahay inuu wajaho baahida caafimaadka iyo nidaamka ka dilidda ku dulnoolaha. Waa in shaqaalaha lagu tababaraa dhameystirka nidaamkan iyo isticmaalka af daboolka marada ka sameysan iyo alaabada nadaafadda.

#### *Talo soo jeedin ku saabsan abuuritaanka nidaamka*

- Qiimeyn ku samee [Talo siinta ee gaarista go'aanada CDC](#) ee nadiifinta meelaha kala duwan ee goobta ganacsiga.
- Akhri [Tilmaamaha faahfaahsan ee CDC](#) ee waxyaabaha lagu nadiifiyo iyo goorta la nadiifiyo iyo sida haboon ee looga dilo dul ku noolaha. Istimaal [waxyaabaha ay ogolaatay EPA ee lagu dilo dul kunoolaha](#) si aad u xaqiijiso kan ku haboon.
- Tilmaanso meelaha gacantu ku badan tahay ee la il duufay oo u baahan in si joogta ah looga dilo dul ku noolaha. Meelaha qaarkood waxa ay noqon karaan goobaha ay dadku arki karaan sida gacan qabsiga albaabada, telefoonada, qalinka, galka jeegagga, nidaamka POS, saxanada cuntada, weelka cabitaanka, alaabada cuntada, iyo qalabka, oogada sare ee musqulaha.

#### *Habka loo yareeyo goobaha gacantu ku badan tahay*

- Istimaal ka weel mar kaliya la isticmaalo oo la tuuro. Haddii aad isticmaasho weelka dib loo isticmaali karo, waa si wanaagsan looga dilaa dul ku noolaha inta aan mar kale la isticmaalin.
- Ka qaad alaabada dadku isticmaalo ee horey loogu diyaariyey. Macaamiisha mar kaliya u wada keen qaadooyinka, mandiiilka, jadwalka cuntada, iyo waxyaabaha kale.
- Istimaal tasmada cuntada ee mar kaliya la isticmaalo, gidaarka lagu dhajiyo, ama barta internetka oo aad ku bedesho tasmada cuntada ee dib loo isticmaalo. Haddii aad isticmaasho tasmada cuntada ee dib loo isticmaalo, waa in ay noqotaa mid faruhu raad kaga tegi karin oo laga dilo dul ku noolaha mar kasta oo la isticmaalo.
- Xiro gacmo gashi marka aad qaadaneyso weelasha ay macaamiishu ku qaataan cuntada.
- Macaamiishu weelkooda haku ritaan cuntada u soo harta. Haddii qof shaqaale ah macmiilka ugu rido weelka cuntada u soo hartay, waa inuu raacaa dariiqa ugu haboon ee nadaafadda iyo isticmaalka gacmo gashiga.
- Daawada gacmaha lagu nadiifiyo dhig goobaha cagtu ku badan tahay ee u dhow wadada dhexe iyo musqulaha.
- Xisaabta ku darso in aad ku rakibtaan hab musqulaha lagu furi karo iyada oo aan gacmaha lagu taaban iyo weel qashinka lagu rido oo la dhigo albaabka musqusha si loo dhiirigeliyo isticmaalka warqadaha gacmaha lagu tirtirto marka la furayo musqusha.

#### *Kala fogaashaha iyo tirada dadka*

- Fadhiga dibadda waxaa la ogol yahay in miisasku isu jiraan 6 dhudhun oo tirada dadkuna ka badneyn 50 qof
- Dadka wada socda waxaa loo ogol 4 qof ama 6 qof haddii ay qoys kaliya ka soo jeedaan.
- Waa in balan la sii qabsadaa;

#### *Talo siin ku saabsan sida ay tani u shaqeyneyso*

- Shaqaalaha ku tababara hawlaha kala duwan.
- Qof shaqaale ah waa in loo xil saaraa nadiifinta iyo geynta kuraasta.
- Shaqaalaha shaqada u kala qeybi si loo yareeyo isu imaatinka shaqaalaha iyo maacaamiisha.
- Jadwal kala duwan u samee shaqaalaha.
- Tilmaanso hawsha la qaban karo marka ay goobta ganacsigu xiran yahay.
- U samee xeyndaab kala sooca, sida miraayad, gaar ahaan meesha lacagta lagu bixiyo.
- Tilmaanso hababka kala duwaan ee lagaga hortegi karo in shaqaaluhu meel isugu soo ururaan Tusaale ahaan, shaqaalaha fariin ama iimeyl ugu dirto hawsha loo xil saaray.

### *Fikradaha ganacsiga lagu kobciyo iyada oo miisasku yar yihiin.*

- Ku dhiiri geli macaamiisha in ay macmacaanka raashinka ay guryaha u qaataan.
- Macaamiishu ha sii sheegaan dalabkooda, ama u bandhig tasmada cuntada ee kooban, gaar ahaan cuntada aan u baahneyn karinta dheer.
- Soo koob cuntada aad diyaariso.
- Lacagta horey uga qaad ama ha bixiyaan iyada oo aan la istaaban. Ka faa'iideyso farsamada casriga ah ee dalabka iyo bixinta lacagta.
- Macaamiisha waqtigooda xadid ama waqti u qabo.

### Dhismayaasha

#### *Talo siin ku saabsan sida diyaargarow loogu diyaariyo in dib loo furo.*

- Biyaha
  - Biyaha kulul iyo kuwa qabow ha socdaan muddo 5 daqiiqo ah kuwaas oo laga yaabo in ay ku jirto bakteeriya khatar ah iyo waxyaabo lagu sumoobo.
  - Hubi in nidaamka biyuhu si wanaagsan u shaqeynayo
- Cayayaanka kala dagaal
  - Ka ilaali in cayayaanku sumeyn cuntada
  - Fiiri in ay cayayaan leedahay oo la dagaalan haddii uu jiro.
- Daadi cuntada xiligeedu dhamaaday
  - Ka fiiri calaamada suyuc gidaarka ku dhashay iyo wax halaabay.
  - Cuntada talaajada ku jirta ka fiiri in ay ur leedahay.
- Hubi in korontada iyo biyuhu si wanaagsan u shaqeynayaan.
- Hubi in dhamaan qalabka nadiifinta iyo makiinadaha weelasha lagu dhaqo si hagaagsan u shaqeynayaan.
- Qiimeyn ku samee [habka HVAC](#) oo dami hadana daar nidaamka hawada ee dhismaha.

### Calaamadaha

- [Physical distancing reminder \(Xusuusiyaha kala fogaashaha\)](#)
- [Occupancy Limit \(Tirada markiiba joogi karta\)](#)
- [Handwashing Reminder \(Xusuusinta gacmo dhaqashada\)](#)
- [Waa maxay COVID-19? \(Waa maxay COVID-19?\)](#)
- [Prevent the spread \(Ka hortagga faafitaanka\)](#)
- [Xirashada af daboolka](#)
- [How/why to wear a mask \(Sidee/waa maxay sababta loo xirto af daboolka\)](#)

### Tixraaca kale

- [Talo soo jeedinta AFDA](#)
- [FDA Guidance \(Talo soo jeedinta FDA\)](#)
- [Local source of hand sanitizer \(Goobaha degaanka ee aad ka heli kartaan gacmo nadiifiye\)](#)

### Qorsheynta ku dhajinta, tabarada iyo u hogaansanaanta

Goobaha ganacsigu waa in ay diyaariyaan Qorshaha Diyaargarowga ee COVID-19, oo qoraal ah, loona qeybiyo dhamaan shaqaalaha, waana in lagu dhajiyaa goobta shaqada meel ay shaqaalaha oo dhan si fudud uga arki karaan. Haddii aanay suurogal aheyn meel lagu dhajiyoo, qorshaha waxaa lagu dhajin karaa internetka, oo loo diro dhamaan shaqaalaha oo dhan inta kalana loo diyaariyo in ay arkaan.

Waa in ganacsigu hubiyaan in shaqaalaha lagu tababaray shaqaalaha oo dhan Qorshaha Diyaargarowga ee COVID-19 iyo shuruudaha laga rabo in la raaco, sidaa darteed waa in shaqaaluhu fahmaan oo ay sameyn karaan taxadarka muhimka ah ee ilaalinta iyo badbaadada shaqaalaha. Tababarkaas waa inuu noqdaa mid fudud oo la fahmi karo oo ku qoran luqad munaasib ku ah ee heerka aqoonta qofka caadiga ah. Goobaha ganacsigu waa in ay



qaadaan talaabooyin lagula soconayo shaqaalaha oo lagu xaqiijinayo in shaqaaluhu fahmeen oo ay raaceen ka hortagga faafitaanka cudurka COVID-19. Waa in la keydiyaa qoraalada cadeynaya u hogaansanaanta shuruudaha tababarka oo la tusaa hay'adda sharci dajinta iyo nabadgelyada guud, oo ay ka mid yihiin DLL marka ay codsadaan.

Maamulka iyo shaqaaluhu waa in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan u hogaansanaanta Qorshaha, dhaqan gelinta dhamaan qodobada, nidaamka iyo habka loo maro badbaadada caafimaadka shaqaalaha.

## Balaarinta Dibadda La Fariisto

Si aad u daboosho kharashka xadidaada in aan gudaha la fariisan karin, Magaalada Minneapolis waxa ay idiin soo bandhigeysaa habab kala duwan oo maqaayadaha u ogolaanaya in ay ka faa'iideysan agagaarka dibadda maqaayadda si ay uga faa'iideystaan ilaalinta caafimaadka dadweynaha. Magaaladu waxa ay joojisay kharashka balaarinta iyaga oo dadajiyey nidaamka ogolaashaha si loogu ogolaado in ay horay uga socdaan iyada aan dib loo dhigin soo gudbinta ogolaashaha. Ganacsiga iyo shaqaaluhu waxa ay ka codsan karaan magaalada in ay isticmaalaan wadada iyo goobaha kale ee isticmaalka dadweynaha. Qorshaha balaarinta waa in uu tixgeliyaa oo ka soo baxaa shuruudaha ADA oo magaalada kala shaqeeyaa wareejinta iyo saameynta uu ku yeelanayo qorshaha isticmaalka.

## Waxyaabaha La Tixgelinayo Fadhiga Dibadda

**Qurxinta** Xaafaduhu taageerayaan oo ay doonayaan in ganacsigu ku noqdo hawl galkiisii hore. Iyada oo taas maanka lagu hayo, waxaa hadana jirta in ay xadidan tahay inta loo dulqaadan karo iyada oo qoysasku ay tixgelinayaan, dadka guryaha ku shaqeynaya, iyo sawaxanka dheeraadka ah ama ciriiriga gawaarida ee goobaha ganacsiga ee ku soo noqonaya hawlgalka. Balaarinta dibadda la fariisto waxa qorshe maanka ku haya qodobadaas oo dhan. Iyada oo si gaar ah loo balaariyo waa mid ku kooban saacado gaar ah ee shaqada iyada oo waafaqsan sharciyada magaalada. Axadda ilaa Khamiista ilaa 10ka fiidnimo iyo Jimcaha ilaa Sabtida ilaa 11ka fiidnimo.

**Bulshada Oo Noqota Xog Wadaag** Balaarinta dhismayaasha si ku meel gaar ah, codsabayaasha waxaa laga doonayaa in ay wargeliyaan ururada xaafadaha, ururada ganacsiga, iyo wakiilka xaafadda ee gudiga magaalada. Waqtiga oo aad u gaaban darteed, waa in aan xaqiijinaa in bulshadu cod ku leedahay oo aan la aamusin. Iyada oo qeyb ka mid ah codsiga, ganacsigu waa in ay siisaa wargelisa dadweynaha shan cisho balaarinta dibadda ee ganacsiga ka hor inta aanay balaarin. Haddii ay magaalada soo gaarto faalo diidmo ah ee bulshada waxaa ganacsiga laga doonayaa in ay dariiq kale u maraan hawlgalka balaarinta.

**Kharashka Leesinka (Ogolaashaha)** Magaaladu way ka dhaafeysaa kharashka ogolaashaha qaxwayaasha wadooyinka, ku durkidda wado lugeedka, iyo balaarinta ku meel gaarka ah ee dhismayaasha. Kharashka laga qaado ganacsiga waa mid dareen ku haya ganacsiga. Magaaladu iyada ayaa isu qabta kharashka ka shaqeynta codsiyada maadaama aan ogolaashaha intooda badan laga daayey kharashka laga qaadi jiray codsiyada xaaladda degdegga ah iyo sidoo kale saameynta dadban ee ay ku yeelaneyso goobaha ganacsiga.

## Noocyada Kala Duwan Balaarinta, Nidaamka Ogolaashaha iyo Kharashka

**Ogolaashaha Balaarinta Ku Meel Gaarka Ah ee Dhismayaasha** Balaarinta Ku Meel Gaarka Ah ee Dhismayaasha waxa ay maqaayadaha u ogolaaneysaa in ay ku balaariyaan fadhiga dibadda ee dhismaha goobta gaadiidka la dhigo ama dhulka cagaaran ee ku dhow.

Ganacsigu waxa ay la soo degi karaan codsiga Balaarinta Ku Meel Gaarka Ah ee Ganacsiga bogga [Business Licensing \(Ogolaashaha Ganacsiga\)](#) ee Magaalada Minneapolis ee [www.minneapolis.gov/licensing](http://www.minneapolis.gov/licensing). Marka aad soo gudbiso codsiga oo la buuxiyey oo ay ku jiraan dhamaan waxyaabaha loo baahan yahay, ganacsiga waxaa la siinayaa Ogolaasho Shuruud ku Xiran (ku meel gaar ah). Ogolaashaha shuruudda ku xiran, ganacsiga waxaa loo ogolaanayaa in ay bilaabi karaan qorshaha balaarinta ee fadhiga dibadda iyaga oo aan dib u dhicin. Shaqaalaha magaalada ayaa eegaya codsiga waxaana laga yaabaa in ay la soo xiriiraan ganacsiga si ay uga xaqiijiyaan

macluamadka, cadeyn la xiriirta qorshaha, ama ay talo ku bixiyaan in wax laga bedelo qorshaha ka hor inta aan la ogolaan. Waxaan qiyaaseynaa in nidaamka ogolaashaha uu qaadanaayo shan (5) maalmood ee maalmaha shaqada.

Goobaha ganacsiga ee doonaya in ay ku daraan dalad la harsado si aad u heshaan goob dibadda ah oo la fariisto uma baahna ogolaasho haddii:

1. Teendhadu waa mid ah nooca hawada lagu buufin karo laakiin qaab dhismeed tiirar ku taagan oo kor u hayaan laguna adkeeyey xargo una adkeysan karta dabeysha iyada oo aan laheyn gidaar dhinacyada kaga dhisan, iyadoo
2. Teendhadu aysan ka yareyn 400 oo dhudhun oo isku wareeg ah xajmi ahaan.

Haddii ay teendhadu ka weyn tahay 400 oo dhudhun oo isku wareeg ah xajmi ahaan, [Tent/Membrane Structure Permit \(Codsiga Ogolaashaha Dhismaha/Teendhada\)](#) ayaa loo baahan yahay.

### *Codsiga iyo kharashka*

Si aad u codsato balaarin ku meel gaar ah, codsaduho waa inuu soo gudbiyaa waxyaabaha soo socda iyo codsi buuxa ee Balaarinta Dhismaha ee Ku Meel Gaarka Ah:

- Qorshaha U Diyaargarowga COVID-19
- Naqshadda goobta oo muujinaya in la tixgeliyey kala fogaanshaha bulshada.
- Shahaadadii u dambaysay ee Ceymiska Iibinta Khamriga oo gaar u ah inta lagu balaariyey.
- Cadeyn muujineysa in la wargeliyey Ururada Xaafadaha, Ururada Ganacsiga, iyo Wakiilka Gudiga Degmada nidaamka balaarinta ee lagu talinayo kaasoo si cad u cadeynaya nooca balaarinta iyo cidda loo gudbinayo cabashada.
- Bixinta kharashka ogolaashaha dhismaha.

Marka uu na soo gaaro codsiga, shaqaalaha balaaritaanku waxa ay:

1. Dib u eegista codsiga aad buuxisay iyo sida uu sax u yahay iyo in la bixiyey kharashkii codsiga.
2. Xaqiijinta in ogolaashaha la bixiyey oo la bilaabo baaritaanka loo baahan yahay.
3. Buuxinta qeybta codsiga balaarinta ee ku meel gaar ka ah ee shaqaalaha baaritaanka.
4. Ogolaashaha waxaa bixiya Maamulaha xafiiska, iyada oo la doonayo inuu saxiixo Sarkaalka Leesinada.
5. Marka uu saxiixo, soo gudbi codiga aad saxiixday ee Leesinka Adeega Macaamiisha ee Iibinta Khamriga adiga oo u soo gudbinaya Keydka Macluumaadka ee Qeybta Khamriga iyo Dhaqan Gelinta Khamaarka (AGED).
6. Codsaha oo iimeyl loogu diro shahaadada leesinka, nuqul ka mid ah codsiga.

Sanadka 2020 Ogolaashaha Balaarinta Ku Meel Gaarka Ah waa \$170. Lacagta lagu bixiyo leesinka waa la joojiyey inta lagu jiro xaaladda degdegga ah.

**Qaxwaha Wado Lugeedyada (Cafe).** Ku balaarinta Cafe wado lugeedyada waxa uu goobaha ganacsiga u ogolaanayaa in ay ku balaarin karaan ganacsigooda wado lugeedyada marka ay ka soo baxaan shuruudo ku xiran sida in ay u hogaansanaadaan shuruudaha ADA ee wado lugeedyada dadku ku lugeeyo, ogolaasho qoraal ah oo aad ka keento mulkiilaha, iyo ogolaashaha ganacsiyada ku dhagan haddii ay balaarintu gaareyso xagga hore ee ganacsigooda. Ogolaashahaas waxa uu ganacsiga u ogolaanayaa in ay café ku balaariyaan wado lugeedyada ku dhagan dhismaha, iyo dhulka aan waxba ka hisneyn. Ujeedada dadaalkan waa balaarin ganacsiga u ogolaanaya in ay u adeegaan tiro u dhiganta tiradii markii hore loo ogolaaday ganacsigooda.

### *Codsiga iyo kharashka*

Waxyaabaha uu ka kooban yahay codsiga ku balaarinta café ee wado lugeedyada ee Codsiga Ogolaashaha Ku Meel gaarka Ah.

Marka uu na soo gaaro codsiga, shaqaalaha baaritaanku waxa ay:

1. Dib u eegista codsiga aad buuxisay iyo sida uu sax u yahay iyo in la bixiyey kharashkii codsiga.
2. Nuqul ka mid ah naqshadda ku balaarinta wado lugeedka oo loo diro Waaxda Hawlaha Guud - Maareynta Isu Socodka
3. Baarayaasha waaxda Hawlaha Guud: Hawlaha Guud waxa ay qiimeeyaan naqshadda iyada oo ay suurogal tahay in ay booqdaan si ay u hubiyaan in nidaamka la raacay. Naqshadda waxaa dib looogu soo diraa Qeybta Leesinada iyada oo lagu lifaaqay ogolaashaha ama diidmada Hawlaha Guud. Naqshadda waxaa ogolaaday oo saxiixa Hawlaha Guud iyaga oo ku qora taariikhda ogolaashaha Xaqiijinta in ogolaashaha la bixiyey oo la bilaabo baaritaanka loo baahan yahay.
4. Buuxinta qeybta codsiga balaarinta ee ku meel gaar ka ah ee shaqaalaha baaritaanka.
5. Ogolaashaha waxaa bixiya Maamulaha xafiiska, iyada oo la doonayo inuu saxiixo Sarkaalka Leesinada.
6. Marka uu saxiixo, soo gudbi codiga aad saxiixday ee Leesinka Adeega Macaamiisha ee libinta Khamriga adiga oo u soo gudbinaya Keydka Macluumaadka ee Qeybta Khamriga iyo Dhaqan Gelinta Khamaarka (AGED).
7. Codsaha oo iimeyl loogu diro shahaadada leesinka, nuqul ka mid ah codsiga.

Sanadka 2020 Ogolaashaha Balaarinta Ku Meel Gaarka Ah ee Dhismayaasha waa \$170 xafladaha soconaya 2 maalmood. Kharashka waa la joojiyey inta lagu jiro xaaladda degdegga ah.

**Isticmaalka cafe ee Wado Lugeedka Xaaladda Degdegga Ah.** Isticmaalka wado lugeedka ee xaaladda degdegga ah waxa uu ganacsiga u ogolaanayaa in ay ku balaariyaan ganacsigooda goobaha gawaarida la dhigto, khadka gaadiidka, oo wadooyinka xiraan si dadku u fariistaan. Mulkiilayaasha ganacsiga, kooxaha ganacsiga, ururada ganacsiga, xaafadaha, ama ururada ganacsiga waxa ay ku codsan karaan isticmaalka wadooyinka iyaga oo soo gudbiya Codsiga Ku Meel Gaarka ah ee Balaarinta Dhismayaasha. Goobaha ganacsiga waxaa laga doonayaa in ay qaadaan mas'uuliyadda naqshadda iyo u diyaarinta goobta meel amaan u ah shaqaalaha iyo macaamiisha. Magaaldu waxa ay dib u eegeysaa qaabka kharashka goobaha gaadiidka la dhigto ee wadooyinka iyo isticmaalkooda.

Sanadka 2020 kharashka Leesinka ee wado lugeedka Café waxa uu ku xiran yahay tirada fadhiga.

- 30 kursi ama ka yar; \$365, iyo
- 31 kursi ama ka badan; \$530

Lacagta lagu bixiyo leesinka waa la joojiyey inta lagu jiro xaaladda degdegga ah.

**Isticmaalka dhulka MPRB** Magaaladu waxa ay la shaqeyneysaa Maamulka Jardiiinooyinka iyo Goobaha Madadaalada (MPRB) si ay isula aqoonsadaan jardiiinooyinka iyo dhulka ee fursad u noqon kara ama xaafadaha ku dhex yaala oo maqaayaduhu ka faa'iideysan karaan iyada oo aan saqaf loo sameyn, deyr loo dhiso, ama lagu balaarin karo fadhi dibadda ah, wado lugeedka café, ama fursadaha kale ee café. Goobaha ganacsiga ee ku dhow jardiiinooyinka MPBR ama dhulka ay daneynayaan in ay ku balaariyaan ganacsigooda la soo xiriir Adeegga Leesinada iyo Macaamiisha.

**Isticmaalka Dhulka Magaaladu Leedahay iyo Dhulka Cagaaran ee Wadooyinka** Magaalada oo dhan waxaa jira dhul loo bixiyey dhulka cagaaran oo ku dhagan wadooyinka oo laga yaabo in lagu balaarin karo maqaayadaha una isticmaal fadhio dibadda ah iyada oo aan dhib ku noqon dadka lugeynaya iyo bushkuleetiyada. Marka ay magaladu ogaatay fursaddan, ma aysan cadeyn nidaamka ogolaashaha ee isticmaalka dhulkaas. Goobaha ganacsiga ee daneynaya isticmaalka dhulkaas waa in ay la soo xiriiraan Adeegga Leesinada iyo Macaamiisha.

## Dib U Eegista Iyo Ogolaashaha

**Qabashada Codsiga.** In ka badan 1,125 leysin oo cuntada iyo iibinta khamriga ee dukaamada Minneapolis, shaqaaluhu waxa ay filayaan in ay si ku meel gaar ah u korodho codsiyada ogolaashaha balaarinta. Magaaladu waxa ay kordhisay tirada shaqaalaha qabta codsiyada oo dib u eega. Horjoogayaasha degmada ayaa eegaya codsiyada marka ugu horeysa iyaga oo la shaqeynaya baarayaasha si loo xaqiijiyo in ay codsiyadu raaceen

nidaamka ka hor inta aan la ogolaan codsiyada. Magaalada waxaa u degsan nidaam si loo hubiyo in codsiyada la diido nidaamka la raacay oo si cadaalad ah oo sax ah la mariyey.

**Kharashka Isticmaalka Bulaacadda (SAC).** Magaaladu kuma xireyso codsiga balaarinta Ogolaashaha ku Xiridda Bulaacadda (SAC) xaaladda degdegga ah ee lagu jiro darteed. Ganacsiyada aan horey u heysan ogolaashaha in ay dibadda ku balaariyaan, waxaa laga doonayaa in ay codsadaan ogolaasho ku meel gaar ah. Xaaladaha caadiga ah, Gudiga Degaanka ee Magaalada (MCES), hay'aha gobolka ee maamula barnaamijka SAC, ayaa ogolaasho laga codsadaa mar kasta oo wax laga bedelayo isticmaalka bulaacadda magaalada iyo nidaamka biyaha. Xaaladda iminka lagu jiro ma aha mid caadi ah. Magaaldu waxa ay heyneysaa diiwaanka ogolaashaha ku meel gaarka ah ee ku balaarinta dibadda. Marka hawluhu ku noqdaan xaaladoodii caadiga aheyd, magaaladu waxa ay la shaqeyneysaa goobaha ganacsiga iyada oo kala shaqeyneysa sidii balaarinta ku meel gaarka ah u sii socon laheyd, xilligaas oo la doonayo sameynta qiimeynta SAC.

**Dhaqangelinta.** Iyada oo lagu saleynayo macluumaadka la soo ururiyey ee qorshaha xaaladda degdegga ah, waxaa la filayaa in ganacsiyadu jabiyaan qorshaha ay ku howl galaan. Marka ay na soo gaarto cabasho lagu soo gudbiyey 311, baarayaasha ayaa la hawl gelinayaa si ay u xaqiijiyaan in la raacay Qorshaha U Diyaargarowga ee COVID-19, naqshadda goobta, saacadaha shaqada, iyo in balaarintu loo adeegsaday sidii lagu cadeeyey codsiga.

Haddii aan si cad loogu ogolaan, saacadaha isticmaalka ee dibad fadhiga waa:

Axad ilaa Khamiis laga bilaabo 8da aroornimo ilaa 10ka fiidnimo iyo

Jimce ilaa Sabti laga bilaabo 8da aroornimo ilaa 11ka aroornimo.

Waxaa laga hadlayaa Adeegga Sharciyada saacadaha fiidkii iyo saaadaha shaqada ka dib ee isu socodka gaadiidka.

Cabashooyinka la filayo in ay soo baxaan waxaa ka mid ah in goobaha ganacsigu isticmaalayaan dibad fadhiga waqti ka baxsan waqtiga loo ogolaaday, in ay ka talaabayaan xeyndaabka ay ogolaadeen ururada xaafadaha iyo kuwa ganacsiga, in aysan u hogaansaneyn qorshaha diyaar garowga ee COVID-19. Cabashooyinka la xiriira COVID-19 ee ilaalinta shaqada, xaqa shaqaalaha iyo ku hawlgalka si amaan ah, Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (MN DLI) ayaa xudun u ah dabagalka cabashooyinkaas.

## Sharciyada Xaaladda Degdegga Ah

Magaaladu waxa ay dajisay xeerarka xaaladda deegdegga ah si ay ganacsiyada ugu ogolaadaan balaarinta dhismaha. Taas waxaa ka mid ah:

1. Sharciyada xaaladda degdegga ah waxa ay si ku meel gaar ah u joojiyeen tirada goobaha gaadiidka la dhigto ee loo baahan yahay. Waxaanu dooneynaa in aan xaqiijino in goobaha gaadiidka dhigtaan ee naafada loogu talo galay aan laga qaadin.
2. Sharciyada xaaladda degdegga ah ee ogolaanaya balaarinta dhismayaasha ee ku meel gaarka ah waxa ay dhaqangalayaan ilaa dhamaadka Oktoobar ilaa bilowga Nofeembar iyada oo laga daayey lacagta ogolaashaha ee \$170 ee ogolaashaha 2 maalmood.
3. Sharciyada ku meel gaarka ah ee ogolaanaya ku balaarinta wado lugeedyada marba haddii ay raacaan sharciyada ADA.
4. Sharciyada xaaladda degdegga ah waxa ay waajib ka dhigayaan in goobaha dadweynaha isugu yimaado dadku xirtaan af dabool oo ay ka mid yihiin, dukaamada, hoteelada, xafiisyada dawladda, iyo hay'adaha adeegga iyo sidoo kale goobaha waxbarashada, goobaha lagu madadaasho, iyo xarumaha adeegga.

Marka gobolka qaado xaaladda degdegga ah, dhamaan sharciyada xaaladda degdegga ah waa dhaqan ka bax (la joojinayaa). Si maqaayadaha loogu isticmaalka fadhiga dibadda, waa inuu jiraa sharci kale oo ku meel gaar ah oo aan weli soo bixin oo u ogolaanaya isticmaalka fadhiga dibadda.